



Home Office

Hawlaha adeegeyaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada iyo macallimiinta ee ay booliiska ugu soo gudbin karaan warbixinta gudniinka dumarka (FGM).

Maxay tahay daraasaadka?

Taariikhda 31 Oktoobar 2015 waxaa la soo saaray sharci ku waajibayo adeegeyaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada iyo macallimiinta in booliiska ay usoo sheegaan dhacdooyinka gudniinka (FGM) ee gabdhaha ka yar da'da 18 jirka.

Tusaale, haddii takhtarku uu arko gabadh ka yar da'da 18 jirka oo lagu sameeyey gudniin (FGM), waa in arrinta uu usoo sheegaa booliiska. Ama, haddii gabadhu ay macallinkeeda u sheegto in lagu sameeyey gudniin (FGM), waa in macallinka uu arrinta usoo sheegaa booliiska.

Maxaa dhici doonaa kadib marka arrinta boliiska loo sheego?

Gudniinka dumarka (FGM) waa dembi weyn, boliiskana waa in si dhab ah ay u baaraan kiisaska loo soo gudbiyo.

Boliiska waxay la kaashan doonaa adeegeyaasha daryeelka bulshada si loo hubsado sugitaanka mudnaanta baahida iyo nabadgelyada gabdhaha.

Maxay tahay sababta loo soo saaray sharciga?

Goorta gabadha lagu sameeyo gudniinka (FGM), waxaa dhacay dembi aad u weyn, sidassi awgeena waa muhiim in boliiska ay isla markiiba baaraan arrinta. Taasi waxay xaqiijineysaa in baaritaan dhab ah la sameeyo.

Ujeeddada sharciga waa xaqiijinta kalsoonida adeegeyaasha ay kaga hortegi karaan falalka gudniinka gabdhaha (FGM), isla markaasina ay sahlanaato habka dacwooyinka loogu gudbiyo booliiska iyo in si habboon loo baaro.

Waxyaabaha sharciga uusan waxba ka qaban Karin

Taasi **macnaheedu ma aha** in booliiska uu tallaabo qaadayo isagoon arrinta kala tashan adeegeyaasha daryeelka bulshada iyo hawladeenada kale ee ku lug leh kiiska.

Sharciga **ma farayo** in adeegeyaasha ay booliiska usoo gudbiyaan kiisaska *tuhunka* gudniinka (FGM) ama haddii ay ula muuqato in gabadhu ay *halis ku jirto*. Sharciga sidoo kale ma khuseeyo hablaha 18 jirka am ka weyn Adeegeyaasha waxay raaci doonaan nidaamka hadda jira ee u degsan baaritaanka kiisaska.

Dulmar: Waajibaadka soo sheegidda gudniinka (FGM)*

Sharcigaasi wuxuu khuseeyaa adeegeyaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada iyo macallimiinta ee England iyo Wales.

Wuxuu farayaa adeegeyaashani in boliiska ay usoo sheegaan, haddii iyadoo ay tahay hawshooda:

- ay gabadh ka yar da'da 18 jir ay u sheegto in lagu sameeyey gudniin (FGM); **ama**
- ay arkaan nabar ama dhaawac muujinayo falalka gudniinka (FGM) ee lagu sameeyey gabadh ka yar da'da 18 jirka, ayna u fahmaan in nabarkaasi uusan ahayn dhaawacyo kale ama astaamo kale ee la xiriira caafimaadka maanka ama dhalashada.

*lagu soo saaray Cutubka 5B ee Xeerka Gudniinka Dumarka (FGM) ee 2003, kuna qoran cutubka 74 ee Sharciga Dembiyada Culus ee 2015.